



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASARAADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAH
AGAASINKA ISTAATISTIKADA QARANKA**



Warbixin Bileedka
TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA
Sebtembar 2018

Warbixin kooban

Guud ahaan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Bishii Sebtembar 2018 wuxuu ahaa 110.36, halka uu ka ahaa 109.09 Bishii Agoosto 2018.

Isbedelka labada bilood u dhaxeeya ayaa ah sare u kac dhan 1.17% oo ah heerka cabirka Badeecadaha, in kastoo Tusaha Sicirka Badeecadaha ee Bishii Agoosto uu hoos u dhacay 0.14% ee heerka cabirka Badeecadaha. qeybaha ugu muhiimsan ee uu qiimahoodu kacay ayaa ahaa *Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska cuntada lagu kariyo* oo gaaray +3.29% ,sare u kacaan ku yimid qeybahaan ayaa ugu muhiimsanaa qeybta korontada.

Guud ahaan Sicir Bararka 12kii bilood, laga soo bilaabo Sebtembar 2017 ilaa Sebtembar 2018 ayaa sare u kacay +3.46% dhibcood ee heerka cabirka sicir bararka Marka la barbardhigo hoos u dhac sannadle ah (Agoosto 2017 ilaa Agoosto 2018) uu ahaa 3.16%.


Shaxda 1: Sicir Bararka, Tusaha Sicirka Badeecadaha; Sebtembar 2018 (Dec 2014 = 100)

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Sebtembar 2018	
Tusaha Bishaan (Sebtembar)	110.36
Tusaha Bishii hore (Agoosto)	109.09
Tusaha sanadkii hore Bisha Sebtembar, (2017)	106.67
Isbedel bileedka % (Agoosto iyo Sebtembar 2018)	1.17%
Isbedelka Sicir Bararka ee sanadlaha %	3.46%

Sicirbararka ee tusaha sicirka Badeecadaha
Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood ee la
soodhaafay

TSB

Tusaha = 100 @ December 2014



Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Sebtembar 2018

Heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Sebtembar 2018

Heerka sicir-bararka Bishii Sebtembar waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sebtembar 2017 ilaa Sebtembar 2018.

Dhammaan qeybaha uu ka koobanyahay TSB ayaa sare u kacay +3.46% ee heerka cabirka badeecadaha 12kii bilood ee la soo dhaafay, halkii uu ka ahaa 3.16% Bishii Agoosto 2017 ilaa Agoosto 2018.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay Bishii Sebtembar ee sanadkaan 1.17%.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay Bishii Sebtembar ee sanadkaan 1.17%. hoos u dhac dhan 0.14% ayaa ku yimid Bishan marka loo barbardhigo Bishii Agoosto 2018.

Sicir bararka qeybo ka mid ah Badeecadaha, Sebtembar 2018.

Sicir bararka qeybaha cuntada iyo cabitaanada caadiga ah, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska cuntada lagu karsado ayaa ah kuwa ugu muhiimsan, uguna miisaanka weyn badeecadaha oo dhan.


Cuntada iyo Cabitaanada caadiga ah ayaa qiimahoodu hoos u dhacay 0.54%. Natiijo ahaan, sicir bararka sannadka oo hoos u dhacay 5.47% Bishii Agoosto 2018. hoos u dhacaan ku yimid

qeybtani waxaa sababay Dalaga oo si wanagsan u soo go'ay. halka sicirbararka Agoosto 2017 ilaa Agoosto 2018 uu ahaa 6.07%.

Qeybta Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska cuntada lagu karsado ayaa sare u kacay bisha Sebtembar qiimahooda gaaray 3.29%. Sicir bararka qaybtaan 12kii bilood ee la soo dhaafay ayaa sare u kacay 1.29%, halka sicir bararka Bishii Agoosto 2017 ilaa 2018 uu ahaa -2.30%.

A. Qeybaha ugu waaweyn ee isbedelka sanadlaha (TSB)

Garaaf 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Sebtembar 2018 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicir bararku Kordhay (+):

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda ayaa hoos u dhacay 8.00% sanadkan marka loo barbardhigo sare u kaca sicirka Sanadkii hore kaas oo gaaray 8.54%. Kor u kacaan ayaa ka dhashay sicirka Dharka caruurta oo gaaray (+11.11%) dabaaldaga Ciida darteed.
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** qiimaha looga cunteeyo ayaa sare u kacay 7.15% labo iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay marka la barbardhigo kororka sicirka Bishii Agoosto 2017 ilaa Agoosto 2018 uu ahaa 5.92%. maqaayadaha, Kafeyga iyo wixii la mid ah, kororka sicirka ayaa kashashay sare u kac ku yimid sicirka maqaayadaha looga cunteeyo oo ahaa (+12.03%).
- **Cuntada iyo cabitaanada** caadiga ah ayaa kordhay sicirkoodu 5.47% labo iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay (Sebtembar, 2017 ilaa Sebtembar 2018). Kororka sicirka ayaa kashashay sare u kac ku yimid sicirka Miraha (sida Muuska & Cambaha IWM) (+27.95%), iyo qudaarta (14.32%).

Gaadiidka ayaa muujiyey hoosu dhac sannadle ah oo dhan 4.75% Bishan Sebtembar sannadka 2018, marka la barbardhigo 4.23% oo lagu diiwaangeliyey sanadki Sebtembar 2017. inta badan sare u kacaan ayaa ku yimid naaftada (12.28%) iyo kala iibsiga gawaarida gacanta labaad oo gaaray 3.28%.


Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay (-):

Tubaakada sicirka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -5.88% bisha Sebtembar 2018. Hoos u dhaca waxaa keenay qiimaha Qaadka oo gaaray hoos u dhaciisu (-10.00%). Isbedelka bisha ee Tubaakada & Qaadka waxuu si buuxda u xaddidaan dhaqdhaqaaqa dhammaan sare u kaca Qeybaha TSB.

Warbixin bileedka Bisha Sebtembar 2018 ee ku saabsan Tusaha Sicirka Badecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websiteka Agaasinka <http://www.dns.org.so>. Twitter @DNS_MoPIED

Qaybaha ugu weyn ee isbedelka bilaha(TSB)

Chart 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qaybaha; Sebtembar 2018 (Dec 2014 = 100)



Qaybaha ugu weyn ee Sicir bararka kordhay bisha Sebtembar (+):

- **Tubaakada** sicirka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 6.46% Bisha Sebtembar 2018,. Sare u kaca waxaa keenay qiimaha qaadka oo gaaray sare u kaciisu (+10.04%) halka Qaadka miraha ka ahaa +4.65% .Isbedelka bisha ee Tubaakada & Qaadka waxuu si buuxda u xaddidaan dhaqdhaqaaqa dhammaan sare u kaca Qeybaha TSB.
- **Qeybta Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** cuntada lagu karsado ayaa sare u kacay Bisha Sebtembar qiimahooda 3.29%. Sicir bararka qaybtaan bishii Sebtembar ee la soo dhaafay ayaa sare u kacay -1.34%, sare u kacaan ayaa si gaar ah looga dareemay **Biyaha iyo Adeega dheeradka** oo gaaray (+16.51%) halka **Korontada iyo Gaaska iyo shidaalka** uu ahaa (5.30%).

Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Sebtembar(-):

- Guud ahaan majiraan wax hoos u dhac muhiim ah oo kuyimid sicirkooda Bishii Sebtembar 2018

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qaybaha badeecadaha ee Sebtembar 2018 ee habka COICOP (Dec 2014=100)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Sebtembar 2017 Tusaha	Agoosto 2018 Tusaha	Sebtembar 2018 Tusaha	% isbedelka bishaan iyo bishiihore	% Isbedelka bisha sanadkaan iyo bisha sanadkii hore
Dhamaan qaybaha TSB	100.00	106.67	109.09	110.36	1.17	3.46
Cuntada & Cabitaanka caadiga	46.04	109.37	114.31	115.36	0.54	5.47
Tubaakooyinka	1.25	130.57	115.43	122.89	6.46	-5.88
Dharka & Kabaha	5.03	100.52	108.49	108.56	0.06	8.00
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska cuntada lagukariyo	23.41	105.81	103.55	106.96	3.29	1.09
Agabka Guryaha	2.93	100.92	111.19	104.63	0.32	3.67
Caafimaadka	5.00	103.29	99.05	100.31	1.28	-2.89
Gaadiidka	3.77	100.63	104.85	105.41	0.53	4.75
Isgaarsiinta	2.80	94.38	94.33	94.33	0.00	-0.06
Hawo bedeleshada & dhaqanka	1.00	100.96	101.91	102.54	0.62	1.57
Tacliinta	4.00	100.32	100.40	97.48	-2.90	-2.83
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	123.85	131.03	132.71	1.29	7.15
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	101.08	103.33	106.12	2.70	4.98

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa lasoo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bil kasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee ku kalayaala afar suuq ee Magaalada Muqdisho.